# ثمرات الإيمان
## Miraha iimaanka

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:
**(إِنَّ الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ يَهْدِيهِمْ رَبُّهُمْ بِإِيمَانِهِمْ تَجْرِي مِنْ تَحْتِهِمُ الأَنْهَارُ فِي جَنَّاتِ النَّعِيمِ)**
(**Kuwa Rumeeyay Xaqa oo falay Camal wanaagsan wuxuu ku Hanuunin Eebahood Iimaankooda waxaana socon Dhexdooda Wabiyadii Jannooyinka Naciimo Dhexdeeda iyagoo ku Sugan**), waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago, waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa

Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

**Intaas kaddib:**

Waxaa ka mid ah nimcooyinka Ilaahay addoomihiisa siiyay inuu u yeelay camal kaste suubban uu qofka sameynayo miro wanaagsan, acmaasha ugu weyn oo faa'idadooda ay kusoo noqonaysa qofka iyo bulshada waa iimaanka Alle -cazza wajalla-, nabiga wuu noo caddeeyay xaqiiqada iimaaka oo ay habboon tahay inuu

ku sugnaado qalbiga mu'minka, taasna waa marka uu weyddiiyay sayidnaa Jibriil iimaanka, wuxuu yiri:

**(...أَنْ تُؤْمِنَ بِاللَّهِ ، وَمَلَائِكَتِهِ ، وَكُتُبِهِ ، وَرُسُلِهِ ، وَالْيَوْمِ الْآخِرِ ، وَتُؤْمِنَ بِالْقَدَرِ خَيْرِهِ وَشَرِّهِ ، قَالَ: صَدَقْتَ)**

(**Inaad rumeyso Ilaahay iyo malaa'igtiisa iyo kutubtiisa iyo rusushiisa iyo maalinta aakhiro, iyo inaad rumeyso qadarka khayrkiisa iyo shartiisa, wuxuu yiri: run ayaad sheegtay**), iimaanka ma aha hadal afka laga dhahayo keliya, ee waxaa laga ictiqaadiyaa qalbiga waxaana laga qirtaa afka xubnahana waa lagaga camalfalaa, iimaanka waa wax ku sugan qalbiga oo uu camalka kaga dhabeeyay raacitaanka amarka Alle iyo ka fogaanshaha waxa uu reebay.

Marka la weyddiiyay Xasan Albasri - *Ilaahay ha u naxariistee* -: mu'min miyaad tahay? Wuxuu ku yiri: imaanka waa labo, haddii aad i weyddiinayso iimaanka Ilaahay iyo malaa'igtiisa iyo kutubtiisa iyo rusushiisa iyo jannada iyo naarta iyo soo saaridda iyo xisaabta aniga mu'min ayaan ahay, haddii aad i weyddiinayso oraahda Alle – *tabaaraka watacaalaa* -:

**(إِنَّمَا الْمُؤْمِنُونَ الَّذِينَ إِذَا ذُكِرَ اللَّهُ وَجِلَتْ قُلُوبُهُمْ وَإِذَا تُلِيَتْ عَلَيْهِمْ آيَاتُهُ زَادَتْهُمْ إِيمَانًا وَعَلَى رَبِّهِمْ يَتَوَكَّلُونَ *الَّذِينَ يُقِيمُونَ الصَّلَاةَ وَمِمَّا رَزَقْنَاهُمْ يُنْفِقُونَ * أُولَئِكَ هُمُ الْمُؤْمِنُونَ حَقًّا)**

**(Mu'miniinta dhabta ah waa uun kuwa marka Alle la xuso ay cabsato quluubtoodu, marka lagu akhriyo**

**korkooda aayaadka Allena ay iimaan u kordhiso, Allahoodana uun tala saarta * ee ah kuwa ooga salaadda waxaan ku arzaaqnayna wax ka bixiya * kuwaas waa mu'miniinta dhabta ah),**

Iimaanka dhabta ah marka uu taabto xuubka qalbiga oo uu qabsado raadkiisa xoogga leh wuxuu kusoo noqonayaa ruuxda iyo caqliga iyo qofka iyo bulshada, maxaayeelay iimaanka iyo amaanka waa mataano mana kala tagaan, wuxuu leeyahay nabigeena- naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

**(لَا إِيمَانَ لِمَنْ لَا أَمَانَةَ لَهُ ، وَلَا دِينَ لِمَنْ لَا عَهْدَ لَهُ)**

(**Imaan ma laha qofaan amaano lahayn, diinna ma laha qofaan ballan lahayn**), sidoo kale iimaanka iyo xishoodka way isku xiran yihiin, wuxuu yiri rasuulka- naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

**(الْحَيَاءُ وَالْإِيمَانُ قُرِنَا جَمِيعًا، فَإِذَا رُفِعَ أَحَدُهُمَا رُفِعَ الْآخَرُ)**

(**Xishoodka iyo iimaanka waa laysku xiray haddii midkooda la qaado midka kalena waa la qaadayaa**), Iimaanka iyo runta waa islaasimaan waxaa laga wariyay Safwaan bin Suleym - Alle ha u naxariistee -inuu yiri waxaa lagu yiri rasuulka Alle:

**أَيَكُونُ الْمُؤْمِنُ جَبَانًا؟ فَقَالَ: ( نَعَمْ ) ، فَقِيلَ لَهُ: أَيَكُونُ الْمُؤْمِنُ بَخِيلًا؟ فَقَالَ: ( نَعَمْ ) ، فَقِيلَ لَهُ: أَيَكُونُ الْمُؤْمِنُ كَذّابًا؟ فَقَالَ: ( لَا)**

(**Mu'minka ma noqdaa fuley? Wuxuu: yiri (haa), waxaa lagu yiri: mu'minka ma noqdaa bakhayl? wuxuu yiri (haa), waxaa lagu yiri: mu'minka beenlow ma noqdaa? Wuxuu yiri: (maya)**)

Qaarkoodi iimaanka waxay ku qeexeen runta waxay dhaheen: iimaanka dhabta ah waa inaad sheegto runta adoona u malaynaya runta inay dhib kuu keenayso, iyo inaadan been sheegin adoona u malaynaya inay beenta wax kuu tari doonto, haddii aad aragto akhlaaq wanaagsan waxaa sabab u ah iimaan sax ah, mu'minka kuma hadlo waxan ahayn hadal fiican oo wax hagaajiya oon wax hallaynin, waxna dhisa oon wax duminin, waxna camira oon wax kharibin, maxaayeelay diinteena xaniifka ah waa diinta akhlaaqda iyo hagaajinta iyo dhista iyo camiridda, qofkii arrinkaas kaaga badiyo diinta ayuu kaa badiyay.

**Miraha iimaanka waxaa ka mid ah**: deganaansho iyo xasillooni, iimaanka marka uu galo nafta aadanaha waxaa ka buuxsamaysa markaas xasillooni iyo yaqiin iyo raalli, waxay ku liibaanaysaa adduun iyo aakhiraba, mu'minka dhabta ah wuxuu yaqiinsan yahay in wixii ku dhacay uuna gafaynin wixii gafayna uuna ku dhacaynin, taas waa wax ka dhigaya qof u dhexaynaya mahadnaq marka uu barwaaqo galo iyo sabar marka uu dhibaato galo, qalbigiisa ayaa ku xasilaya inuu khayr u yahay wax kaste Alle u qaddaray, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

**{وَمَن يُؤْمِن بِاللَّهِ يَهْدِ قَلْبَهُ}**

(**Qofkii Alle rummeeyo qalbigiisuu hanuunin**), wuxuu leeyahay nabigeena:

**(عَجَبًا لِأَمْرِ الْمُؤْمِنِ ، إِنَّ أَمْرَهُ كُلَّهُ خَيْرٌ وَلَيْسَ ذَاكَ لِأَحَدٍ إِلَّا لِلْمُؤْمِنِ ، إِنْ أَصَابَتْهُ سَرَّاءُ شَكَرَ ، فَكَانَ خَيْرًا لَهُ ، وَإِنْ أَصَابَتْهُ ضَرَّاءُ صَبَرَ ، فَكَانَ خَيْرًا لَهُ)**

(**Waxaa la yaab leh arrinka Mu'minka, dhab ahaantii dhammaan arrinkiisa oo dhan waa khayr, taasna uma sugna qof aan mu'min ahayn, haddii wanaag soo gaaro wuu mahadiyaa taasna khayr ayay u tahay, haddii uu dhib ku dhacona wuu sabraa taasna khayr ayay u tahay**).

**Waxaa ka mid ah inuu iimaanka ka reebo qofka xumaanta inuu sameeyo**: wuxuu leeyahay nabigeena:

**(لاَ يَزْنِي الزَّانِي حِينَ يَزْنِي وَهُوَ مُؤْمِنٌ ، وَلاَ يَشْرَبُ الخَمْرَ حِينَ يَشْرَبُ وَهُوَ مُؤْمِنٌ ، وَلاَ يَسْرِقُ حِينَ يَسْرِقُ وَهُوَ مُؤْمِنٌ ، وَلاَ يَنْتَهِبُ نُهْبَةً ، يَرْفَعُ النَّاسُ إِلَيْهِ فِيهَا أَبْصَارَهُمْ حِينَ يَنْتَهِبُهَا وَهُوَ مُؤْمِنٌ)**

(**Ma sinaysto qofka sinaysta markuu sinaysanayo asoo mu'min ah, ma xado markuu xadayo asoo mu'min ah, ma boobo boob ay dadka indhaooda la raacayaan markuu boobayo asoo mu'min ah**), sidoo kale mu'minka dhabta ah naftiisa inuu ka hufayo waxkastoo

dadka dhibaya sida jeesjeeska iyo kajanka iyo malada xun, wuxuu yiri Alle:

**{يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا لَا يَسْخَرْ قَوْمٌ مِّن قَوْمٍ عَسَى أَن يَكُونُوا خَيْرًا مِّنْهُمْ وَلَا نِسَاءٌ مِّن نِّسَاءٍ عَسَى أَن يَكُنَّ خَيْرًا مِّنْهُنَّ وَلَا تَلْمِزُوا أَنفُسَكُمْ وَلَا تَنَابَزُوا بِالْأَلْقَابِ بِئْسَ الِاسْمُ الْفُسُوقُ بَعْدَ الْإِيمَانِ وَمَن لَّمْ يَتُبْ فَأُولَٰئِكَ هُمُ الظَّالِمُونَ}**

(**Kuwa xaqa rumeeyow yuuna yasin ragna rag (kale) waxay u dhawdahay inuu ka khayr badanyahaye, haweenna yayna haween yasin waxay u dhawyihiin inay ka khayr badanyihiine, hana ceebeynina naftiinna, hana isugu dhawaaqina naanays xun, waxaa xun magaca faasiqinimada iimaan kadib, ciddaan tawbad keeninna waa daalimiin**), wuxuu yiri Alle:

**{يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا اجْتَنِبُوا كَثِيرًا مِّنَ الظَّنِّ إِنَّ بَعْضَ الظَّنِّ إِثْمٌ وَلَا تَجَسَّسُوا وَلَا يَغْتَب بَّعْضُكُم بَعْضًا أَيُحِبُّ أَحَدُكُمْ أَن يَأْكُلَ لَحْمَ أَخِيهِ مَيْتًا فَكَرِهْتُمُوهُ وَاتَّقُوا اللَّهَ إِنَّ اللَّهَ تَوَّابٌ رَّحِيمٌ}**

(**Kuwa xaqa rumeeyow ka dhawrsada wax badan oo mala ah, maxaayeelay malaha qaarkiis waa dambi, hana is jaasuusina, qaarkiinna qaar yuusan xamanin, miyuu jecel yahay midkiinna inuu cuno Hilibka walaalkiis oo mayd ah, waad neceb tihiin arrintaa, Eebana ka dhawrsada waa tooba aqbale naxariistee**), iimaanka wuxuu keenaa saafinimada qalbiga, wuxuu yiri Alle:

**{لَّوْلَا إِذْ سَمِعْتُمُوهُ ظَنَّ الْمُؤْمِنُونَ وَالْمُؤْمِنَاتُ بِأَنفُسِهِمْ خَيْرًا وَقَالُوا هَٰذَا إِفْكٌ مُّبِينٌ}**

(**Maxaydaan markaad maqasheen xaalka (qadafka) ayna ugu malayn mu'miniinta ragga iyo haweenka naftooda khayr, oyna u dhihin kaasi waa been abuur cad**).

**Miraha iimaanka waxaa ka mid ah**: xoojin iyo gargaar Alle xaggii laga helayo, iimaanka dhabta ah addoonka wuxuu u keenayaa inuu Alle la jiro wuxuu leeyahay Alle:

**{وَأَنَّ اللَّهَ مَعَ الْمُؤْمِنِينَ}**

(**Allana wuxuu la jiraa mu'miniinta**), la jirka halkan waxaa laga wadaa gargaar iyo kaalmo iyo xoojin, wuxuu leeyahay Alle:

**{يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا إِن تَنصُرُوا اللَّهَ يَنصُرْكُمْ وَيُثَبِّتْ أَقْدَامَكُمْ }**

(**Kuwa xaqa rumeeyow haddaad u gargaartaan Eebe (Diintiisa) isna wuu idiin gargaari, cagihiinana wuu sugi**), wuxuu leeyahay subxaanahu:

**{ إِنَّا لَنَنْصُرُ رُسُلَنَا وَالَّذِينَ آمَنُوا فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَيَوْمَ يَقُومُ الْأَشْهَادُ}**

(**Annagaa u gargaari Rasuuladanada iyo kuwa rumeeyay xaqa nolosha adduun iyo maalinta ay kici maragyadu**), wuxuu leeyahay Alle:

**{وَكَانَ حَقًّا عَلَيْنَا نَصْرُ الْمُؤْمِنِينَ}**

(**Waxaana korkanaga ah u gargaarka Mu'miniinta**), wuxuu leeyahay:

**{الَّذِينَ قَالَ لَهُمُ النَّاسُ إِنَّ النَّاسَ قَدْ جَمَعُواْ لَكُمْ فَاخْشَوْهُمْ فَزَادَهُمْ إِيمَاناً وَقَالُواْ حَسْبُنَا اللّهُ وَنِعْمَ الْوَكِيلُ * فَانقَلَبُواْ بِنِعْمَةٍ مِّنَ اللّهِ وَفَضْلٍ لَّمْ يَمْسَسْهُمْ سُوءٌ وَاتَّبَعُواْ رِضْوَانَ اللّهِ وَاللّهُ ذُو فَضْلٍ عَظِيمٍ}**

(**Ee ah kuwaa ay ku dhaheen dadku dadkii baa idiin kulmay ee ka cabsada oo u siyaadiyey rumeyn, oy**

**dhaheen kaafiyahanagu waa Ilaahay isagaana u fiican wakiil * Oo la noqday nicmo Alle iyo fadli oyna taaban xumaan raacayna raalli ahaanshaha Alle, Ilaahayna waa fadli wayn lahaade**).

**Miraha iimaanka waxaa ka mid ah:** inuu Alle ku abuuro jacaylka addoonka dadka quluubtooda, waxaad arkaysaa mu'minka dhabta ah inuu yahay qof jilicsan, wuu jeclaadaa waana la jeclaadaa, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

**{إِنَّ الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ سَيَجْعَلُ لَهُمُ الرَّحْمَنُ وُدًّا}**

(**Kuwa Xaqa rumeeyay ee Camal fiican falay wuxuu u yeeli Eebaha Raxmaanka Jacayl**), addoonka lama aado xagga Alle qalbi si dhab u rumaysan hadday dhacdo Alle wuxuu lasoo aadayaa quluubta mu'miniinta, xadiiska qudsiga waxaa ksuoo arooray:

**(إِذَا أَحَبَّ اللَّهُ الْعَبْدَ نَادَى جِبْرِيلَ إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ فُلَانًا فَأَحْبِبْهُ فَيُحِبُّهُ جِبْرِيلُ فَيُنَادِي جِبْرِيلُ فِي أَهْلِ السَّمَاءِ إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ فُلَانًا فَأَحِبُّوهُ فَيُحِبُّهُ أَهْلُ السَّمَاءِ ثُمَّ يُوضَعُ لَهُ الْقَبُولُ فِي الْأَرْضِ)**

**(haddii Ilaahay addoonka jeclaado Jibriil ayuu u dhawaaqayaa: Ilaahay wuxuu jecel yahay hebel jeclow, waxaa jeclaanaya Jibriil, wuxuu u dhawaaqayaa Jibriil dadka cirka ku sugan: Ilaahay wuxuu jecel yahay hebel jeclaada, waxaa jeclaanaya dadka cirka ku sugan, kaddib oggolaansho ayaa dhulka loo keenayaa)**, sidoo kale xadiiska qudsiga Alle wuxuu ku leeyahay:

(لَا يَزَالُ عَبْدِي يَتَقَرَّبُ إِلَيَّ بِالنَّوَافِلِ حَتَّى أُحِبَّهُ، فَإِذَا أَحْبَبْتُهُ كُنْت سَمْعَهُ الَّذِي يَسْمَعُ بِهِ، وَبَصَرَهُ الَّذِي يُبْصِرُ بِهِ، وَيَدَهُ الَّتِي يَبْطِشُ بِهَا، وَرِجْلَهُ الَّتِي يَمْشِي بِهَا ، وَلَئِنْ سَأَلَنِي لَأُعْطِيَنَّهُ، وَلَئِنْ اسْتَعَاذَنِي لَأُعِيذَنَّهُ)

**(… kama suulo addoonkayga inuu iigu soo dowaado sunnooyinka ilaa aan ka jeclaado, markaan jeclaadana waxaan noqonayaa maqalka uu wax ku maqlo, aragga uu wax ku arko, iyo gacantiisa uu fidinayo iyo lugtiisa uu ku soconayo, hadduu wax i weyddiiyo waan siinayaa, hadduu magangalyo i warsadana waan magangalinayaa**).

**Waxaa ka mid ah**: iimaanka inuu sabab u yahay feydidda kurbooyinka iyo qaadidda balada iyo suulinta murugta, wuxuu leeyahay nabigeena:

(أَلا أُخْبِرُكُمْ بِشَيْءٍ إِذَا نَزَلَ بِرَجُلٍ مِنْكُمْ كَربٌ أَوْ بَلاءٌ مِنْ بَلايَا الدُّنْيَا دَعَا بِهِ يُفَرَّجُ عَنْهُ؟) ، فَقِيلَ لَهُ : بَلَى ، فَقَالَ : (دُعَاءُ ذِي النُّونِ : {لَا إِلَهَ إِلَّا أَنْتَ سُبْحَانَكَ إِنِّي كُنْتُ مِنْ الظَّالِمِينَ} ، فذلك للمؤمنين عامة

(**Ma idin sheegaa wax haddii qofka kurbo ku dhacdo ama balo oo ka mid ah balada adduunka oo uu ku ducaysto, lagaga qaado?)** waxaa lagu yiri: noo sheeg, wuxuu yiri: (**ducada Thinnuun**): (**Ilaah aan Adi Ahayn**

**ma Jiro Nasahnaantaada Anigu waxaan ka Mid ahaa kuwa Daalimiinta ah**), wuxuu yiri Alle markaas kaddib:
**{فَاسْتَجَبْنَا لَهُ وَنَجَّيْنَاهُ مِنَ الْغَمِّ وَكَذَلِكَ نُنجِي الْمُؤْمِنِينَ}**
(**Waana Ajiibnay kana Korinay Murugtii, Saasaana u Korinaa Mu'miniinta**) taasna mu'miniinta oo dhan ayay u sugan tahay.

**Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka**

***

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago, waxaan qirayaa sayidkeena iyo nabigeena inuu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

**Walaalaha islaamka ahow:**

**Miraha iimaanka waxaa ugu weyn** in iimaanka uu keenayo amaan iyo nabad bulshadeed, mu'minka dhabta ah markuu iimaanka qalbigiisa dego wuxuu noqonayaa qof amaan laga helo iyo xasillooni iyo deganaan, dadkana amaan ayay kaga helayaan naftooda iyo hantidooda, wuxuu leeyahay nabigeena:

**(الْمُسْلِمُ مَنْ سَلِمَ النّاسُ مِنْ لِسَانِهِ وَيَدِهِ ، والمُؤْمِنُ مَنْ أَمِنَهُ النَّاسُ عَلَى أَمْوَالِهِمْ وَأَعْرَاضِهِمْ)**

(**Muslinka waa midka ay dadka ka nabadgalaan carrabkiisa iyo gacantiisa mu'minkana waa kan dadka u nabadgaliya hantidooda iyo sharftooda**), mu'miniinta akhlaaqdooda ka mid ma aha in la argagixiyo dadka amaanka haysta ama in lagu xadgudbo xataa hadday yihiin dad aan muslin ahayn, wuxuu leeyahay rasuulka:

**(مَنْ قَتَلَ مُعَاهَدًا لَمْ يَرِحْ رَائِحَةَ الجَنَّةِ ، وَإِنَّ رِيحَهَا تُوجَدُ مِنْ مَسِيرَةِ أَرْبَعِينَ عَامًا)**

(**Qofkii dilo mucaahad jannada ma urinayo iyadoo carafteeda laga helayo meel loo socdo afartan sano**), wuxuu caddeeyay nabiga inuusan iimaan dhammaystiran lahayn qofkii dhibaya dariskiisa ama qof bariyay asoo dhergan dariskiisana gaajaysan yahay asoona og, wuxuu yiri:

(وَاللَّهِ لاَ يُؤْمِنُ، وَاللَّهِ لاَ يُؤْمِنُ ، وَاللَّهِ لاَ يُؤْمِنُ ، قِيلَ : مَنْ يَا رَسُولَ اللهِ؟ قَالَ: الَّذِي لاَ يَأْمَنُ جَارُهُ بَوَائِقَهُ)

(**Wallaahi ma rummaynayo, wallaahi ma rummaynayo wallaahi ma rummaynayo, waxaa lagu yiri: waa kuma rasuulkii Allow?, wuxuu yiri: midka deriskiisa aan ka nabadgelin shartiisa**), wuxuu leeyahay:

(مَا آمَنَ بِي مَنْ بَاتَ شَبْعَانَ وَجَارُهُ جَائِعٌ إِلَى جَنْبِهِ وَهُوَ يَعْلَمُ)

(**Ima rummaynin qofkii bariyo asoo dersikiisa dhiniciisa ku gaajaysan yahay asoo og**), iimaanka dhabta ah waa kan qofka ku xambaaraya inuu wanaag sameeyo dadkana u kaalmeeyo, waa midka qofka akhlaaqdiisa hagaajiyo, raadkiisana dhaqankiisa ayuu ka muuqanayaa iyo dhammaan dhaqdhaqaaqiisa koonka oo dhan iyo la dhaqankiisa dadka oo dhan asoo u naxariisanayo dadka iyo xayawaanka iyo manoolaha asoo raadinaya raalliga Alle keligiisa, wuxuu yiri Alle:

{وَيُطْعِمُونَ الطَّعَامَ عَلَى حُبِّهِ مِسْكِينًا وَيَتِيمًا وَأَسِيرًا * إِنَّمَا نُطْعِمُكُمْ لِوَجْهِ اللَّهِ لَا نُرِيدُ مِنْكُمْ جَزَاءً وَلَا شُكُورًا}.

(**Waxayna Quudiyaan iyagoo jecel miskiinka Agoonka iyo kan qafaalka ah * Iyagoo Dhihi waxaan idiin quudinnay dar Alle, mana idinka doonayno Abaalmarin iyo Mahadnaq Midna**).

Maxaa ka fiican oraahda gabyaaga:

إِذَا الإِيمـانُ ضَـاعَ فَلاَ أَمَـانٌ * وَلا دُنيَـا لِمَـــن لَمْ يُحْيِ دِينَـا

وَمَن رَضِيَ الحَيَـاةَ بِغَـيرِ دينٍ * فَقَـدْ جَعَـلَ الفَنَـاءَ لهَـا قَرِينَـا

**Hadduu iimaanka lumo amaan uma sugna * iyo adduunba qofkaan diinta nooleyn.**

**Qofka nolosha raalli kaga noqda diin la'aan * baabba'a ayuu saaxiib uga dhigay**

Waxa ugu weyn miraha rummeynta Ilaahay (cazza wajalla) waa waxa Ilaahay ugu diyaariyay addoomihiisa mu'miniinta Aakhiro oo ah ajar weyn iyo nimco joogto ah, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

**{ إِنَّ الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ يَهْدِيهِمْ رَبُّهُم بِإِيمَانِهِمْ تَجْرِي مِن تَحْتِهِمُ الْأَنْهَارُ فِي جَنَّاتِ النَّعِيمِ}**

(**Kuwa Rumeeyay Xaqa oo falay Camal wanaagsan wuxuu ku Hanuunin Eebahood Iimaankooda waxaana socon Dhexdooda Wabiyadii Jannooyinka Naciimo Dhexdeeda iyagoo ku Sugan**), wuxuu leeyahay:

**{وَبَشِّرِ الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ أَنَّ لَهُمْ جَنَّاتٍ تَجْرِي مِنْ تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ}**

(**Ugu bishaaree kuwa rumeeyay (xaqa) Camal fiicanna falay inay mudan Janooyin ay socoto dhexdooda Wabiyaalkii**), wuxuu leeyahay:

**{وَالَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ أُولَئِكَ أَصْحَابُ الْجَنَّةِ هُمْ فِيهَا خَالِدُونَ}**

(**Kuwa rumeeyay (xaqse) oo camal wanaagsan sameeyay kuwaasi waa asaxaabta Jannada wayna kuwaari dhexdeeda**), wuxuu leeyahay cazza wajalla:

**{إِنَّ الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ إِنَّا لَا نُضِيعُ أَجْرَ مَنْ أَحْسَنَ عَمَلًا}**

(**Kuwa rumeeyay (Xaqa) oo camal fiican falay annagu ma hallayno Ciddii Wanaajisa Camalka**), wuxuu leeyahay Alle -jalla sha'nuh -:

**{إِنَّ الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ كَانَتْ لَهُمْ جَنَّاتُ الْفِرْدَوْسِ نُزُلًا * خَالِدِينَ فِيهَا لَا يَبْغُونَ عَنْهَا حِوَلًا}**

(**Kuwa rumeeyay (xaqa) oo fala camal fiican waxay u ahaatay jannada firdowso degid, (martiqaad)**), waxaa ku sugan xadiiska qudsiga: in Alle (caza wajalla) yiri:

**(أعدَدتُ لِعبادي الصّالِحين ما لا عينٌ رأَتْ، ولا أذُنٌ سَمِعَت، ولا خَطَر على قلْبِ بشَرٍ)**

(**Waxaan u diyaariyay addoomahayga suubban wax aan il arkin dhegna maqlin qalbi basharna kusoo dhicin**), kaddib wuxuu akhriyay rasuulka:

**{ فَلَا تَعْلَمُ نَفْسٌ مَا أُخْفِيَ لَهُمْ مِنْ قُرَّةِ أَعْيُنٍ جَزَاءً بِمَا كَانُوا يَعْمَلُونَ }**

(**Ma oga Naf waxa loo qariyay kuwaas oo indho ku qaboowsadaan abaal marin waxay camalfalayeen dartiis**).

Waxaa nagu habboon inaan xaqiijino iimaanka caqiido ahaan hadaal ahaan iyo fal ahaan, markaas ay faafto isu naxariisashada iyo iskaalmaynta iyo runta iyo xishoodka iyo deeqsinimada iyo dhowrsanaanta, waxaan ka fogaanaynaa beenta iyo qishka iyo khiyaanada iyo xanta iyo iskudirka iyo afxumida iyo dulmiga iyo tiimbashada crdiga, iyo inaan ilaalino xurmada nafta iyo xquuqda hantida iyo wanaagga iyo qiimaha dalka.

**Ilaahayow na jecleysii iimaanka kuna qurxi qalbigeena, gaalnimada iyo fisqiga iyo caasinimada kuwa neceb naga dhig, nagana mid yeel kuwa hanuunsan dalkeenana xifdi iyo dhammaan dalalka caalamka**